

# AUSCO

## Barnaamijka Tilmaan-siinta Dhaqaneed ee Australia

## BUUGGA-SHAQADA EE ARDAYGA




Australian Government
Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya'dda Caalamiga ee Socdaalka ayadoo ka wakiila Wasaaradda Australia ee Adeegyada Bulshada

IOM • OIM

# Tusmada

Bilaabidda . . . . . . . 2

Cutubka 1aad: Australia – Dulmar . . . . . . . 3

Cutubka 2aad: Degitaanka . . . . . . . 5

Cutubka 3aad: Guri-siinta . . . . . . . 7

Cutubka 4aad: Caafimaadka . . . . . . . 9

Cutubka 5aad: Lacagta . . . . . . . 11

Cutubka 6aad: Waxbarshada . . . . . . . 13

Cutubka 7aad: Shaqada . . . . . . . 15

Cutubka 8aad: Sharciga . . . . . . . 17

Sheekooyinka degitaanka . . . . . . . 18

Diiwaanka la heli karo . . . . . . . 19

# Bilaabidda

Ku soo dhawow Barnaamijka Tilmaan-siinta Dhaqaneed ee Australia (Australian Cultural Orientation Program - AUSCO). Ujeeddada AUSCO waa inuu macluumaad kaa siiyo safarkaaga Australia iyo inuu kaaga jawaabo in badan oo su'aalhaaga ku saabsan Australia intii suurtagal ahba.

Aan ka bilowno inaan ogaano WAXAAD doonayso inaad ogaato. U-adeegso gudubka hoose si aad u qorto su'aalahaaga. Markii aad maqasho jawaabta mid ka mid ah su'aalahaaga intaad joogto AUSCO, hoos ku qor jawaabta. AUSCO waxay ku siinaysaa macluumaad badan waxaana adag in la wada xusuusto!

Marka uu dhammaado barnaamijku, mar labaad eeg su'aalahaaga waxaadna hubisaa inaad heshay dhammaan jawaabihii aad u baahnayd. Mararka qaarkood su'aalahaagu way adkaan doontaa in laga jawaabo ilaa aad dhabtii ka timaado Australia. U-qaado xidhmadaada AUSCO Australia si aad usii wado inaad jawaabo u-hesho su'aalaha muhiimka kuu ah.

### Waa maxay su'aalahaaga ku saabsan Australia iyo degiddaada halkaas?

| Su'aalo | Jawaabaha |
|---|---|
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |

# **Cutubka 1aad** Australia – dulmar

Australia waa waddan fursado ka buuxaan iyo waayo-aragnimooyin cusub.

Waxay kaloo tahay waddan aad u weyn, midka lixaad ee ugu weyn adduunka. Taas macnaheedu waa in qayb kasta oo Australia ah inay ka duwan tahay kuwa kale. Xagga waqooyiga Australia cimiladu waa dhulalka kulaylahaa, xagga koofurtana waa qabow.

In kastoo ay waddan weyn tahay, Australia ma lahan dadweyne ballaaran – waa ilaa dad 23 malyan ah. Badiba dadkaasi waxay ku nool yihiin magaalooyinka xeebaha ah, hase ahaatee waxaa kaloo jira magaalooyinka beeraha oo gudaha ku yaal. Magaalo madaxda caasimada Australia waa Canberra, gudaha ayey ku taal.

Isla markiiba aad degto noloshaada cusub ee Australia waxaad wax badan ka baran doontaa oo ku saabsan dhammaan gobolada kala duwan Australia. Ilaa hadda, waxaad Xiiso  doontaa magaalo-weynta ama magaalada yar taas oo marka kowaad aad degi doonto. Xidhmadaada macluumaadka waxaa ku jira buug-yare ku saabsan gobolada kala duwan ee Australia.

## Dhaqdhaqaaq

**Isbarbardhiga Australia iyo waddamada kale**

U-adeegso khariidada hoose inaad ku muujiso halkaad degi doonto markaad timaaddo Australia.
Intee buu le'eg yahay waddankaaga hooyo marka la barbardhigo Australia? Ma ku dul sawiri kartaa khariidada?



Siyaabahee bay meesha aad u guurayso kala mid tahay ama kaga duwan tahay halkaad hadda ku nooshahay, ama halkaad hore ugu noolayd?

Cimilada?

Dadweynaha?

Warshadaha?

Qaabka-dhulka?



Dadka Australia waxay ka kala yimaadeen daafaha adduunka oo dhan. Boqolkiiba afartan iyo lix dadka Australia waxay ku dhasheen waddanka dibadiisa. Waxay la yimaadeen caadooyin kala duwan, kuwaas oo ay xor u yihiin inay ku dhaqmaan maaddaama aysan jebinayn sharciga Australia.

Waa maxay akhlaaqda, caadooyinka ama dhaqamada aad aragtay oo ka duwan wixii aad ku dhaqmi jirtey?

Sidee baad u aragtaa/dareemeysaa kala duwanaantaas?

# **Cutubka 2aad** Degitaanka

Sida ugu dhaqsaha badan oo loo degaa Australia waa in shaqo laga helo oo Ingiriisiga la barto lakiin hase ahaatee sababtoo waa inaad timid waddan cusub, arintaasi muddo ayey qaadan kartaa. Markaad timaado dowladdu waxay ku siin kartaa taageerooyin muhiim ah si laguugu caawiyo inaad la qabsato noloshaada cusub.

Garwadeen (Qof shaqaale) ah ama qofkii- kuu soo dacwoodey (ahaa propoer-ka) ayaa kugu caawin doona inaad hesho adeegyadaas.

## Dhaqdhaqaaq

Ka hor intaadan bilaabin mowduucaan qoro waxay yihiin taageerooyinka aad filayso in lagu siin doono markaad timaaddo Australia. Wixii fikrad kasta ah waxaad kaloo qorataa halkaad ka heshay macluumaadkaas.

Marka uu dhammaado mowduucu waxaan dib u-eegi doonaa qoraaladaadii si aan u-eegno haddii aad u baahan tahay inaad isbaddalo samayso.

| **Waxaan filayaa inaan heli doono taageeradan markaan imaado Australia** | **Halkee baad ka heshay macluumaadkan?** | **Sax miyaad ahayd?** |
|---|---|---|
| Garoonka/Madaarka | | |
| Gurisiinta | | |
| Lacagta | | |
| Waxbarashada | | |
| Caafimaadka | | |
| Alaabada Guriga | | |
| Manfacyada | | |
| Cuntada | | |
| Shaqo | | |
| Xannaanada Ilmaha | | |

# Dhaqdhaqaaq

Adeegga maku aadin kartaa adeegga ayada bixiya?

| | |
|---|---|
| **Caseworker** | Lacag-bixinada la siiyo xanaanada Caruurta (childcare-ka) iyo taageeridda nolosha |
| **Centrelink** | Fasallada lagu barto Ingiriisiga |
| **Medicare** | Buuggagta, wargeysyada iyo majalladaha ku qoran luqadaha kala duwan si loo amaahdo |
| **Adult Migrant English Program (AMEP)** | Qofka kugu caawiya inaad degto oo aad hesho adeegyada |
| **Translating and Interpreting Service (TIS National)** | Wuxuu bixiyaa taageero si loo bixiyo qarashyada daawada |
| **Special Broadcasting Service (SBS)** | Turjumidda macluumaadka si aad ugu maqasho luqaddaada |
| **Public library** | Radiyaha iyo wararka TV-ga oo luqado badan ku baxa |

# **Cutubka 3aad** Gurisiinta

Waxaa jira noocyo badan oo kala duwan oo ah hoyga Australia. Gurisiinta magaala weynta waa ka duwan yahay kan xaafadaha, waana ka duwan yahay kan magaalooyinka gobolada. Guryahu way ka duwan yihiin kuwii aad garanaysey oo aad waayo-aragnimooyinka u lahayd.

Qarashka kiradu iyo gadashada guryaha halkan Australia waa mid sarreeya. Marka kowaad oo aad timaado waxaad u baahan doontaa inaad guri kireysato.

## Dhaqdhaqaaq

Aan isbarbardhigno halkaad hadda ku nooshahay iyo halkaad ku noolaan doonto Australia. Gudubka saddexaad waa inaad adigu buuixso markaad Australia tagto.

| **HADDA** | **HADDA** | **MUDDO LABO BILOOD AH** |
|---|---|---|
| Imisa ayaad bixisaa si aad ugu noolaato hoygaaga hadda ah? | Imisa ayaad u malaynaysaa inaad bixin doonto si aad ugu noolaato hoygaaga Australia? | Imisa AYAAD bixisaa? |
| Imisa qol ayuu leeyahay hoygaaga hadda ah? | Imisa qol ayaa u malaynaysaa in hoygaaga Australia uu lahaan doono? | Imisa qolal AYAAD haysataa? |
| Waa maxay tas-hiilaadka uu hoygaagu hadda leeyahay? | Waa maxay tas-hiilaadka aad u malaynayso in hoygaaga Australia uu lahaan doono? | Waa maxay tas-hiilaadka AAD haysato? |
| Miyaad filaysaa in hoygaagu ka wanaagsanaan doono la mid noqon doono ama ka liidan doono halkaad hadda ku nooshahay? Siyaabahee? | | Hoygaaga Australia ma kaafiyey filitaankaagii? |

# Dhaqdhaqaaq

Waxaa jira erayo sharciyeed oo muhiim ah ayna tahay inaad barato si ay kaaga caawiyaan inaad dareento kontaroolida habka kireysiga. Ku-turjum erayadan doorka ah luqaddaada si aad u haysato liiska tixraaca waxtarka ah markii aad timaado Australia. Buug-yaraha macluumaadka oo ku saabsan Gurisiinta ayaa ku siin doona xoogaa bidhaamin ah.

| | |
|---|---|
| Lease | |
| Landlord | |
| Tenant | |
| Real estate agent | |
| Bond | |
| Utilities | |
| Condition report | |
| Inspection | |
| Accommodation | |

# **Cutubka 4aad** Caafimaadka

Australia waxay leedahay nadaam daryeel-caafimaad oo wacan hase ahaatee waxay u shaqaysaa si ka duwan sidii aad taqaaney.

Waxaad ku heli doontaa daryeelka-caafimaadka asaasiga ah oo lacag la'aan ah ama mid-la-kabay ayadoo loo maro nadaamka loo yaqaan Medicare-ka. Si kastaba ha ahaatee, adeegyada qaarkood sida dhaqtarka ilkaha iyo helidda okiyaalaha maahan kuwo lacag la'aan ah.

Waxaad ugu tagi doontaa Dhaqtarka Guud (General Practitioner - GP) ama dhaqtar badiba dhibaatooyinkaaga caafimaad. Haddii dhibaatooyinkaagu usii baahdaan daaweynta dhaqtar takhasusle ah waxay kuu diri doonaan dhaqtar takhasusle ah.

Halkan waxaa ku yaal shax taas oo muujinaysa tallaabooyinka kala duwan oo dhici kara markii dhaqtarka loo tago.

Raac tallaabooyinka waxaadna aqoonsataa markii ay ka duwan yihiin waayo-aragnimooyinkaagii marka loo tagayo dhaqtar.

Markii aad xanuun dareento, ama aad qabto dareen caafimaad tallaabadaada kowaad waa inaad u tagto dhaqtarkaaga GP.

### Wac dhaqtarkaaga GP si aad ballan uga samaysato

↓

Dhaqtarka GP ayaa badanaa xalliya dhibaatadaada ama ka jawaaba tabashadaada. Wuxuu kuu qori karaa daawada qaarkeed.

↓

U-qaado daawadaada laguu qoray farmashiga. Waa inaad sugto ilaa 15 daqiiqo ama ka badan farmashiistahu inuu kuu diyaariyo daawada.

Tilmaan-bixinta sida loo qaadanayo daawadaada waxay ku-dul qoran tahay dhalada ama bokiska daawada.

↓

Haddii dhaqtarka GP uu kaa doonayo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xanuunkaaga wuxuu kuu diri doonaa rugta shaybaarka cudurada si baaris loo sameeyo, tusaale ahaan, si loo qaado oo loo baaro dhiigga. Dhaqtarka GP wuxuu ku siin doonaa meel-u-dirida loo qaato rugta shaybaarka cudurada.

↓

U-qaado meel-u-diridda rugta shaybaarka cudurada soona samee baarista.

Rugta shaybaarka cudurada waxay u-diraysaa natiijada baaristaada dhaqtarkaaga GP.

↓

Ayadoo hadba ku xiran natiijooyinkaaga waxaad u baahan doontaa inaad mar labaad u tagto dhaqtarkaaga GP.

↓

Haddii dhaqtarka GP uusan xallin karin dhibaatadaada wuxuu kuu dirayaa dhaqtarka takhasuslaha ah. Waxayna ku siin doonaan warqadda meel-u-diridda.

↓

Wac dhaqtarka takhasus ulaha si aad ballan uga samaysato soona qaado warqaddaada meel-u-diridda.

## Dhaqdhaqaaq

Ku qor ereyada caafimaadka ee muhiimka ah luqaddaada. Buug-yaraha macluumaadka oo ku saabsan Caafimaadka ayaa ku siin doona xoogaa bidhaamin ah.

| | |
|---|---|
| Dhaqtarka | |
| Nadaamka daryeelka caafimaad | |
| Takhasuslaha | |
| Farmashiyaha | |
| Qoraalka daawada | |
| Isbitaalka | |
| Degdegga | |
| Dhaqtarka ilkaha | |
| Ballanta | |
| Daawo | |

# **Cutubka 5aad** Lacagta

Tallaabadaada kowaad halkan Australia waxaa ka mid ah inaad furato akoonka bangiga aadna diyaarsato caawimaadda dhaqaale ku-meel-gaar ah ee Centrelink. Markaas ka dib waxaad cagta saaraysaa maamulidda doolarada iyo santiyada lacagta Australia waxaadna go'aansanaysaa wax ku saabsan sida loo maareeyo dakhligaaga.

## Dhaqdhaqaaq

Baro xoogaa erayada Ingiriisiga ah oo ku saabsan bangiga iyo lacagta Australia. Baar erayada Ingiriisiga ee loo adeegsado tibaaxaha bangiga ee guud. Buug-yaraha macluumaadka oo ku saabsan Lacagta ayaa ku siin doona xoogaa bidhaamin ah.

| | |
|---|---|
| Akoonkan bangigu waxay lacagtaada ka ilaalisaa xatooyada ama lumidda. | |
| Baasweedhka loo adeegsado Mashiinada Teelarka Atoomaatiga ah (Automatic Teller Machine - ATM) iyo gadashooyinka EFTPOS-ka. Waxaa muhiim ah in lagu xafido baasweedhkan meel ka badbaadsan dadka kaleeto. | |
| Kaarku wuxuu kuu ogolaanayaa inaad ku bixiso alaabta iyo adeegyada lacag aad soo amaahatay. | |
| Waxaa jira mashiin kaas oo kuu ogolaanaya inaad lacag caddaan ah kala soo baxdo akoonka bangigaaga adigoo adeegsanaya Lambarka Aqoonsiga Shaqsiyeed (Personal Identification Number - PIN). | |
| Wxuu u-ogolaanayaa isticmaaleyaasha inay alaabta ku bixiyaan lacagta ay haystaan ayagoo adeegsanaya kaarkooda ATM baddalkii lacag caddaan ah, badiba tafaariiqleyda. | |

### Lacagta Australia

Waa kuma kan sawirkiisu ku yaal wejiga hore xaashida $5.00 ee Australia? ______________________




Sheeg magaca xayawaanka ku sawiran $1.00 ee Australia ______________________



Garwadeen Qof shaqaalahaaga ama qofkii-sponsar-kaga ayaa kugu caawin doona inaad degto Australia, hase ahaatee adigaa ka masuula sidaad u maaraynayso dakhligaaga si aad u daboosho baahiyahaaga iyo rajooyinkaaga mustaqbalka. Qarashka nolosha ee Australia wuu sarreeyaa markaasna ku noolaanshaha miisaaniyada waxay kaa caawinaysaa inaad daboosho baahiyahaaga degdegga ah iyo inaad mustaqbalka qorshayso.

Maxaad u malaynaysaa inaad jeceshahay inaad soo gadato marka ugu horreysa oo aad Australia timaado?

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

## Dhaqdhaqaaq

### Miisaaniyad-samaysiga

Halkan waxaa ah siyaabaha aad uga fakari karto miisaniyad-samaysiga. Soo tax dhowr waxyaalood ee qayb kasta ku jira. Muddo laba bilood ah way ka duwanaan kartaa sidii hore ee isku day mar labaad inaad samayso markaad degto gurigaaga cusub.

| HADDA | MUDDO LABO BILOOD AH |
| --- | --- |
| **Qarashyada joogtada ah** – Kuwaani waa qarashyada ay tahay inaad bixiso ama dhibaatooyin ayaa ku dhici kara adiga ama qoyskaaga.<br>• ____<br>• ____<br>• ____<br>• ____ | |
| **Qarashyada isbadbedela** – Kuwaani waa qarashyada aad ku leedahay inaad kontaroosho. Waad u baahan tahay badeecada ama adeegga hase ahaatee waxaad go'aansan kartaa intaad ka gadanayso ama intaad ka isticmaalayso adeegga.<br>• ____<br>• ____<br>• ____<br>• ____ | |
| **Dheeraad** – Kuwaani waa qarashyo aad kontarool buuxa ku leedahay. Maahan inaad gadato hase ahaatee waa kuwo aad doonayso inaad hesho.<br>• ____<br>• ____<br>• ____<br>• ____ | |

# **Cutubka 6aad** Waxbarashada

Markaad samaynayso qorsheyaasha si aad ugu guurto gurigaaga cusub ee Australia, waxaad qabi kartaa fikrado ku saabsan nooca nolosha aad heli doonto, nooca shaqada aad ka shaqayn doonto ama sida qoyskaagu ay u dhex-degi doonaan bulshadan cusub. Ballan-qaadyada shaqsinimadaada inaad barato Ingiriisiga aadna ka faai'daysato fursadaha waxbarasho waxay kugu caawin doonaan degitaanka halkan Australia.

## Dhadhaqaaq

Buug-yaraha macluumaadka oo ku saabsan Waxbarashada Dugsiga ayaa ku siin doona xoogaa bidhaamin ah.

### Qaabka waxbarashada dugsiyada ee Australia

| **Heerka** | **Da'da (Ugu dhawaan)** | **Garaydka** |
|---|---|---|
| Malcamadaha | 3-5 | N/A |
| Dugsiga Barbaraarin | 5-6 | N/A |
| Dugsiga Hoose | 6-12 | 1-6 |
| Dugsiga Sare | 12-18 | 7-12 |
| **Ogsoonow:** Dowlad-goboleedyada qaarkood dugsiga Hoose wuxuu ku dhammaadaa Sannadka 7aad iyo dugsiga Sarena wuxuu ka bilowdaa Sannadka 8aad. Weydii qofka ku ah sponsor-ka ama qofka-garwadeen ah wixii macluumaad dheeraad ah. | | |

Siyaabahee buu nadaamka waxbarashada ee Australia kala mid yahay ama kaga duwan yahay halkaad hadda ku nooshahay, ama halkaad hore ugu noolayd?

Waxbarashada dowladda oo lacag la'aanta ah oo la siiyo carruurta

______________________________

______________________________

______________________________

Malcamadaha oo loogu talagalay carruurta afarta sano jirta

______________________________

______________________________

______________________________

Waxbarashada khasabka oo loogu talagalay carruurta da'dooda u dhaxaysa shan iyo 17 sano

______________________________

______________________________

______________________________

Gabdhaha iyo wiilasha oo dugsiga wadajir u-dhigta

______________________________

______________________________

______________________________

Waalidiinta oo laga filayo inay ka qaybgalaan munaasabadaha dugsiga iyo waxbarashada ilmahooda

______________________________

______________________________

______________________________

Halkan Australia, fursadaha waxbarashada iyo shaqo-helidda waa kuwo si dhow isugu xiran. Maaddaama aad u diyaargarowdo inaad ku noolaato Australia, waa maxay qorsheyaasha aad qabto si ay u daboosho baahiyahaaga waxbarasho?

## Dhaqdhaqaaq

**Qorshaynta waxbarashadaada iyo shaqo-helidaada mustaqbalka**

Buug-yaraha macluumaadka oo ku saabsan Waxbarashada Dadka-Waaweyn ayaa kaa caawin doonta nashaadkan.

Sidee bay muhiim kuugu yihiin adeegyadaani?

| Adeeggan | Aad muhiim u ah | Xoogaa muhiim u ah | Aad muhiim uma ahan |
|---|---|---|---|
| Dhigashada koorsdada AMEP | | | |
| Dhammaystirka shahaadada dugsiga sare ee Koleejka Taknikada iyo Waxbarashada Dheeraadka ah (Technical and Further Education - TAFE) | | | |
| Dhammaystirka mihnad ama koorsada xirfadaha ee TAFE | | | |
| Isku-qoridda koorsada jaamacadda oo undergraduate ah | | | |
| Isku-qoridda koorsada jaamacadda oo post graduate ah | | | |
| Dhigashada koorsada waxbarashada bulshada | | | |

In kastoo Garwadeenka (Qof-shaqaalaaga) ama qofkii-ku-isboonsaray ayaa kugu caawin doona inaad hesho adeegyada waxbarashada dadka-waaweyn, waa maxay qorsheyaasha aad samayn karto si lagaaga caawiyo habkaas? Waa maxay dokumantiyada aad u baahan tahay inaad soo-qaadato?

- 
- 
- 
- 
- 

Waa maxay su'aalaha aad ka qabto oo ku saabsan waxbarashada oo aad doonayso inaad raacdo markaad timaado Australia?

- 
- 
- 
- 
- 

# **Cutubka 7aad** Shaqo-helidda

Suuqa shaqada ee Australia waa mid tartan ah, kaas oo shaqooyinka lagu siiyo mudnaanta dadka haysta waayo-aragnimooyinka iyo shahaadooyinka khuseeya. Xirfadaha luqadda Ingiriisiga aad ayaa loo qadariyaa. In badan oo dadka farsama-yaqannada ah iyo xirfadleyaasha waxay ku qaadataa inay waqti ka shaqeeyaan shaqooyinka aan-xirfadda ku dhisnayn ilaa intay ka baranayaan Ingiriisiga ama intay helayaan in shahaadooyinkooda la aqoonsado ama kor-loo-qaado. **Xusuusnow:** taasi waqti bay qaadataa waxaana jira adeegyada dowladda kuwaas oo dadka ku caawiya inay bartaan Ingiriisiga ama ay shaqo helaan ama tababar galaan.

## Dhaqdhaqaaq

Buug-yaraha macluumaadka oo ku saabsan Shaqo-helidda ayaa kugu caawin doona nashaadkan.

Akhri tibaaxda oo ku calaamadee haddii ay run tahay ama been tahay.

| | | |
|---|---|---|
| 1. jobactive waxay igu caawin kartaa inaan shaqo helo | Run | Been |
| 2. Waxaan heli doonaa taageerda dakhliga markaan imaado Australia | Run | Been |
| 3. Qofka ila shaqeeya ah ayaa shaqo ii-helaya | Run | Been |
| 4. Xirfadaha Ingiriisiga waxay muhiim u yihiin helidda shaqada | Run | Been |
| 5. Dadka Iskaa wax uqabso (folanteeriga) ah waxay qaataan lacag | Run | Been |
| 6. Maahan inaad canshuur ku bixiso Australia | Run | Been |
| 7. Raga iyo haweenka si siman ayaa loogula dhaqmaa goobta-shaqada | Run | Been |
| 8. Isla markii aad shaqo hesho waa inaad Centrelink usoo sheegtaa | Run | Been |
| 9. Inaad waqtiga shaqada dhowrto waa muhiim | Run | Been |
| 10. Carruurta yaryar way shaqayn karaan halkii ay ka aadi lahaayeen dugsiga | Run | Been |

## Dhaqdhaqaaq

**Baro erayada Ingiriisiga qaarkood**

Waxaa jira erayada qaarkood oo ay tahay inaad barato si ay kaaga caawiyaan inaad u-fahamto shuruudaha qaarkood ama waxyaalaha lagaa filayo oo ku saabsan shaqo-helidda Australia. Ku-turjum erayadan doorka ah luqaddaada si aad u haysato liiska tixraaca waxtarka ah markii aad timaado Australia.

Tax File Number ______________________

Bank account ______________________

Work experience ______________________

Interview ______________________

Reference ______________________

Qualifications ______________________

Volunteer ______________________

## Dhaqdhaqaaq

### Qorshaynta shaqada Australia dhexdeeda

Maxay tahay nooca shaqada aad ka doonayso Australia?

U-samee qorshe sidaad ku gaari karto shaqadaas.

| Miyaan haystaa waxyaalahan? | Haa | Maya |
|---|---|---|
| Xirfadaha luqadda Ingriisiga | | |
| Shaahdooyinka noocan shaqada | | |
| Waayo-aragnimada qaybtan shaqada | | |
| Tixraacyo | | |
| Risumeega | | |
| Xirfadaha wareysiga | | |
| Doonitaanka inaad aqbasho taxadiyaadka iyo caqabadaha | | |
| Macluumaadka ku saabsan si loo helo shaqadan | | |

Ka samee qoraalo ku saabsan waxaad jeceshahay inaad ka-qabato Australia.

# **Cutubka 8aad** Sharciga

Caqiidooyinka iyo dhaqamada dadku waxay siiyaan siyaabaha ay u arkaan una dhex-galaan adduunka. Markii aad Australia degtoba, waxaad la kulmi doontaa siyaabo kala duwan ee nololeed iyo caqiidooyinka. Taasi waxay noqon kartaa mid taxadigeeda leh, gaar ahaan haddii qiyamka iyo caqiidooyinka ay lidi ku yihiin qiyamkaaga iyo caqiidooyinkaaga. Waxaa muhiim ah in la xusuusto in Australia ay leedahay nadaamka sharciyeed ee cilmaaniga ah kaas oo bixinaya bulsho ammaan ah oo siman, bulsho dadka ka filaysa inay ka masuul yihiin falalkooda shaqsi iyo anshaxooda.

## Dhaqdhaqaaq

Sharciga Australia way ka duwanaan karaan kuwii waddankaaga ama waddamadii kale ee aad ku noolayd. Ku calaamadee shaxda hoose ee soo-socota haddii sharciyada Australia ay la mid yihiin ama ka duwan yihiin. Calaamdee kuwa taxadiga ku ah dhaqankaaga iyo caqiidooyinkaaga. Buug-yaraha macluumaadka ee ku saabsan Sharciga Australia ayaa kaa caawin doonta nashaadkan.

| **Sharciyada** | **Isku-mid** | **Kala-duwan** | **Taxadi ku ah dhaqankayga iyo caqiidadayda** |
|---|---|---|---|
| Sharciyada ku saabsan siinta lacag saraakiisha dowladda | | | |
| Sharciyada ku saabsan kaalinta booliiska | | | |
| Sharciyada cilmaaniga ah, aan ahayn shaciyada diiniga ah | | | |
| Sharciyada ku saabsan rabshada guriga iyo qoyska iyo rabshada ah qaab ciqaabeedka | | | |
| Sharciyada ku saabsan ku-sidashada mindiyaha ama hubka kale goobaha dadweynaha | | | |
| Sharciyada guurka | | | |
| Sharciyada ku saabsan da'da ogolaanshaha | | | |
| Sharciyada ku saabsan khamriga iyo sigaar-cabidda | | | |
| Sharciyada ku saabsan daroogooyinka | | | |
| Sharciyada ku saabsan xuquuqda loo-siman yahay ee haweenka | | | |
| Sharciyada ku saabsan wadidda baabuurka | | | |

**Ka samee wixii qoraalo ah oo ku saabsan wixii aad ka doonayso inaad ka sii ogaato wax ku saabsan markii aad timaado Australia.**
**Tusaale ahaan**

- Saldega Isteeshanka Booliiska ee kuugu dhow iyo taleefan lambarka si aad u wacdo markii wax degdeg ah jiraan
- Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sharciyada iyo wadidda baabuurka
- Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo anshaxo carruurta ayadoo la raacayo sharciyada Australia.

## Sheekooyinka degitaanka

Australia waxay dejinaysey qaxooti ilaa iyo Dagaalkii Adduunka ee 2aad, oo ah bartamihii qarnigii la soo dhaafey. Waxay sameeyeen tabarucaad muhiim ah xagga bulshada, dhaqanka iyo nolosha dadka Australia. Mid kasta oo dageyaashaas ka mid ah wuxuu leeyahay sheeko uu ka sheego safarkiisa.

## Dhaqdhaqaaq

Aqri sheekada uu ku siiyey tababarahaaga AUSCO kalana hadal safarkoodii ardayda aad isku fasalka tihiin.

Maxay ahaayeen taxadiyaadkii ay la kulmeen?

Maxay sameeyeen oo ku caawisay inay ka guulaystaan taxadiyaadkaas?

Maxaad la wadaagtaa oo ka siman tihiin qofkaas xagga sheekada degitaanka?

Maxay sheekada degitaankaaga u-e'kaan doontaa?

## Diiwaanka gaaritaanka

Ilaa intee baad ku kalsoon tahay wax ku saabsan mid kasta oo soo-socda?

- Haddii aad dareemayso inaad aad iskugu kalsoon tahay ku qor isku-tallaab sanduuqa ☒
- Haddii aad dareemayso inaad xooga fahamsan tahay hase ahaatee aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah ku qor islaash sanduuqa ⧄
- Haddii aad in yar taqaan ama aadan waxba aqoon iska-dhaaf sanduuq oo bannaan.

Lagaama filayo inaad isku-tallaab ku qorto sanduuq kasta. AUSCO waa barnaamij horudhac ah sidaa darteed badiba natiijooyinkan waxbarasho waa la gaari doonaa ka dib markii aad hesho waayo-aragnimada ku noolaanshaha Australia iyo markii aad sii tagto barnaamijyadooda tilmaan-siinta halkaas.

## Dulmarka Australia

| Miyaad: | Adigu ma: | Miyaad samayn kartaa waxyaalahan: |
|---|---|---|
| ☐ u-aqoonso Ingiriisigu inuu yahay luqadda qaran ee Australia<br>☐ u-aqoonso Australia inay tahay qaarad weyn oo leh sooneyaal cimilo kala duwan<br>☐ fahan Australia tahay bulsho dhaqamo-badan leh dadweyne soogalooti ballaaran ah<br>☐ ogtahay qiyamka salka u ah diimoqaraadiyada barlamaaniga Australia<br>☐ fahamsan tahay in dadka Aboriginal iyo Torres Strait Islanders ay ku noolaayeen Australia ku dhawaad 50,000 sano | ☐ Weydisu'aalaha aqoonta guud oo ku saabsan Australia<br>☐ garan kartaa in dowlad-goboleedyada iyo teritooriga Australia oo ay ku jiraan magaalo-madaxyadu<br>☐ garan kartaa hijraadkii degitaanka taariikhiga ahaa ee Australia<br>☐ magacaaw qaar ka mid ah dhaqannada kala duwan oo aad ku aragtay Australia<br>☐ sharax xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga diimoqaraadiyeed, iyo siduu u-shaqeeyo habka doorasha<br>☐ magacaaw xisbiyada siyaasadda ee waaweyn Australia ka jira<br>☐ magacaaw fasaxyada dadweynaha ee Australia sharax sababta loogu dabaaldego | ☐ inaad gasho imtixaanka muwaadinimada<br>☐ inaad isku-diiwaangeliso inaad codeyso<br>☐ inaad hesho macluumaadka ku saabsan xisbiyada siyaasadeed iyo ajandeyaashooda |

## Adeegyada dejinta

| Miyaad: | Adigu ma: | Miyaad samayn kartaa waxyaalahan: |
|---|---|---|
| ☐ fahan dib-u-dejinta inay tahay wax mudo dheer ah<br>☐ aqoonso inay jiraan taxadiyaad inta lagu jiro marxaladaha hore ee dib-u-dejinta<br>☐ aqoonso muhimadda codsiga caawimaadda markii loo baahdo<br>☐ fahan inay jiraan haya'daha adeegyada dowladda iyo kuwa bulshada oo la heli karo si ay uga caawiyaan dib-u-dejinta<br>☐ fahan in lagugu qori doono qof caseworker ah (Garwade ah)<br>☐ fahan inay jiraan howlo muhiim ah oo dhowr ah oo ay tahay inaad soo dhameyso markaad timaaddo Australia | ☐ garan kartaa howlaha muhiimka ah oo ay tahay inaad soo samayso asbuuca ugu horreeya oo aad timaado Australia<br>☐ sheeg kaalinta qofka shaqaalaha ah caseworkers iyo qofka ku isboonsaray<br>☐ garan kartaa haya'daha dowladda iyo kuwa bulshada oo la heli karo si ay kuugu caawiyaan dib-u-dejinta<br>☐ garan kartaa adeegyada kale oo asaasiga ah kuwaas oo laga heli karo bulshada degaanka, tusaale ahaan, naadiyada cayaaraha, kooxaha bulshada | ☐ inaad hesho adeegyada fasiraadda iyo turjumidda<br>☐ inaad ku soo buuxiso macluumaadka asaasiga ah foomamka rasmiga ah<br>☐ inaad adeegsato gaadiidka dadweynaha<br>☐ inaad furato akoon bangi<br>☐ inaad iska diiwaangeliso Centrelink<br>☐ inaad iska diiwaangeliso Medicare-ka<br>☐ inaad isku qorto barnaamijka Ingiriisiga |

## Gurisiinta

| Miyaad: | Adigu ma: | Miyaad samayn kartaa waxyaalahan: |
|---|---|---|
| ☐ fahan inay jiraan gurisiin noocyo ballaran ah oo laga heli karo Australia<br>☐ fahan inaad bixiso kirada si aad hoyga ugu noolaato iyo in qarashka kireysiga halkan Australia ukala duwan tahay gobolada kala duwan<br>☐ fahan heerka hoyga aad iska bixin doonto marka u horreysa oo aad Australia degto<br>☐ fahan inay tahay masuuliyadaada inaad ilaaliso nadaafadda iyo bilicda guriga kuu kiraysan<br>☐ fahan in hoygaaga kowaad ee Australia uu noqon karo mid ku-meel-gaar ah waxaana kuu diyaarin doona qofkaaga caseworker ah<br>☐ fahan in dadka kelida ah inay u baahan doonaan inay dadka kale hoyga la wadaagaan halkan Australia | ☐ adeegsan kartaa kalmadaha ku saabsan habka kireysiga<br>☐ magacaaw adeegyada guriga oo ay tahay inaad soo xirato aadna ka masuulka tahay inaad bixiso<br>☐ magacaaw meelaha guryaha kirada ah lagu iclaamiyo<br>☐ magacaaw xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga adoo ah kireyste<br>☐ magacaaw xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga milkiilaha guriga` | ☐ inaad baarto oo aqoonsato hoyga habboon<br>☐ inaad buuxiso macluumaadka muhiimka ah oo ku saabsan foomamka kireysiga<br>☐ inaad soo-xirato adeegyada guriga |

## Caafimaadka

| Miyaad: | Adigu ma: | Miyaad samayn kartaa waxyaalahan: |
|---|---|---|
| ☐ fahan inay jiraan hubinta caafimaadka oo ay tahay inaad marto ka hor iyo ka dib markaad Australia timaaddo<br>☐ fahanin aad loogu taliyey in carruurtaadu ay qaataan tallaalka<br>☐ garanaysaa in dugsiyada qaarkood ay u baahan yihiin diiwaanka xaalladda tallaalka ilmaha in la keeno markay bilaabaan daryeelka maalinta ah ama dugsiga<br>☐ fahan inuu jiro daryeelka-caafimaadka oo lacag la'aan ah ama kabid ah ayadoo loo marayo nadaamka loo yaqaan Medicare-ka<br>☐ fahan inaan dhammaan adeegyada caafimaadku aysan lacag la'aan ahayn tusaale ahaan ilko-galinta iyo okiyo-samaynta<br>☐ fahanin caafimaadka uu ku jiro caafimaadka dhimirka ayna jiraan adeegyada la-talinta oo lacag la'aan ah si laguu taageero<br>☐ garanaysaa inaad usoo qaadato dokumantiyadaada caafimaadka Australia | ☐ sharax kartaa halka loo aado shuruudaha qiimaynta caafimaadka ee dib-u-dejinta Australia<br>☐ sharax kartaa wixii ay Medicare-ku daboosho iyo wixii aysan dabooli karin<br>☐ sheeg kartaa faraqa u dhaxeeya adeegyada caafimaadka dadweynaha iyo kuwa gaarka ah oo ay ka midka yihiin kaalinta caymiska caafimaadka gaarka ah<br>☐ muujin kartaa adeegyada caafimaadka kala duwan oo ka mid yihiin marka la helo ayaga iyo sida loo helo<br>☐ sharax qiimaha ay leedahay tallaabooyinka caafimaadka ka-hortagga ah oo uu ka midka yahay tallaalku<br>☐ garanaysaa caafimaadka dhimirka iyo adeegga la-talinta oo laga heli karo gobolka dejintaada | ☐ inaad soo samayso shuruudaha qiimaynta caafimaadkaaga markaad timaaddo Australia<br>☐ inaad iska diiwaangeliso Medicare-ka<br>☐ inaad qaadato waajibaadka shaqsi ee caafimaadka iyo ladnaanta naftaada iyo tan qoyskaaga<br>☐ inaad wacdo adeegyada degdegga ah haddii loo baahdo sidaas<br>☐ inaad hesho adeegyada caafimaadka ku habboon baahiyahaaga<br>☐ inaad adigu ka hadasho baahiyaha caafimaadkaaga ama adoo maraya adeegga turjumaanka |

## Waxbarashada

| Miyaad: | Adigu ma: | Miyaad samayn kartaa waxyaalahan: |
|---|---|---|
| ☐ fahan kaalinta AMEP<br>☐ qadarisaa muhumidda barashada Ingiriisiga si loo helo waxbarasho sare iyo shaqo-helidda<br>☐ fahan in nadaamka waxbarashada uu ka koobmo qaybaha dadweynaha iyo kuwa gaarka<br>☐ fahan faraqa u dhaxeeya dugsi dhigashada dadweynaha iyo kan gaarka ah<br>☐ fahanin waxbarashada dowladda inay tahay lacag la'aan<br>☐ fahanwaajibaadka waalidiinta ee xagga waxbarashada carruurtooda<br>☐ fahan inay jiraan dariiqooyinka loo maro jaamacadda iyo waxbarashada dheeraadka ah<br>☐ ogow in shahaadooyinkaaga lagu turjumi karo Ingiriisiga ayadoo lacag la'aan ah | ☐ adeegsan kartaa kalmadaha ku saabsan erayada waxbarashada<br>☐ isbarbardhigi kartaa oo faraq u-yeeli kartaa nadaamka waxbarashada Australia adoo u-eegaya waayo-aragnimooyinkaaga<br>☐ samayn kartaa go'aanka ku saabsan dugsi-dhigashada carruurta<br>☐ sheeg dariiqooyinka suurtagalka ah oo loo maro jaamacadda iyo waxbarashada dheeraadka ah<br>☐ garo adeegyada taageerada ay heli karaan dadka doonaya inay waxbartaan | ☐ inaad tagto wareysiyada waalidka iyo baraha ayadoo ay ku taageeryso TIS<br>☐ inaad baarto, doorato oo isku qorto koorsada jaamacadda oo kugu habboon<br>☐ inaad carruurta ku qorto dugsiga degaanka aadna soo buuxiso warqadaha lagama maarmaanka ah<br>☐ inaad fahamto in ka-maqnaanshaha dugsigu uu waalidku ku soo ogolaado foom qoraal ah oo loo soo diro dugsiga<br>☐ inaad fahamto markii lagu jiro fasax-weynaha dugsiga, inaad diyaarsato daryeelka carruurta da'da dugsiga ah inta lagu jiro fasax-weynaha dugsiga |

### Sharciga

| Miyaad: | Adigu ma: | Miyaad samayn kartaa waxyaalahan: |
|---|---|---|
| ☐ fahan in dadka oo dhan ay u siman yihiin sharciga hortiisa halkan Australia<br>☐ fahan xorriyadda taasoo asalka u ah sharciyada Australia<br>☐ fahanin booliiska ay tahay in la ixtiraamo oo aan laga biqin<br>☐ fahan in dhammaan noocyada rabshadda guriga iyo kan qoyska iyo xadgudubka galmada inay ka soo-horjeeddo sharciga ayadoo sharciyadaas loo hirgeliyo ayagoon wax kala reeb lahayn<br>☐ fahan in saraakiisha dowladda Australia oo ay ku jiraan saraakiisha booliiska aysan ku dhicin inay qaataan haddiyado ama laaluushyo<br>☐ aqoonso tahay inay jiraan sharciyo ku saabsan lahaanshaha iyo ka shaqaynta baabuur gaar ah, galmada, khamriga, tubaakada, iyo rabshadda<br>☐ fahan in sharciga diimeed aan la hirgelin karin haddii ay khilaafsan tahay sharciga Australia | ☐ ma fili kartaa falalka sharci-darrada ka noqon kara Australia<br>☐ garosaa haya'daha aad la xiriiri karto haddii aad u baahato taageero sharciyeed<br>☐ sheegi kartaa noocyada rabashada qoyska iyo wixii laga samayn karo si wax looga qabto rabshada qoyska | ☐ inaad la xiriirto booliiska haddii aad dhibaato la kulanto<br>☐ inaad la-xiriirto haya'daha haddii aad u baahan tahay taageero sharciyeed<br>☐ inaad la-xiriirto haya'daha haddii aad u baahan tahay caawimaad xagga maaraynta tabashooyinka guriga ama qoyska |

### Shaqosiinta

| Miyaad: | Adigu ma: | Miyaad samayn waxyaalahan: |
|---|---|---|
| ☐ fahan in suuqa shaqada uu yahay mid tartan ah<br>☐ fahan in shahaadooyinka dibadeed lagu aqoonsan karo Australia<br>☐ fahan muhiimadda barashada Ingiriisiga si loo helo shaqo<br>☐ qirsan tahay in shaqooyinka lagu siiyo mudnaan dadka leh waayo-aragnimo iyo shahaadooyin khuseeya shaqadaas<br>☐ fahan xuquuqda iyo waajibaadka shaqaaluhu ku leeyihiin halkan Australia<br>☐ fahan habka loo maro codsiyada shaqada iyo wareysiyada<br>☐ ogow in shahaadooyinkaaga lagu turjumi karo Ingiriisiga ayadoo lacag la'aan ah | ☐ adeegsan kartaa kalmadaha ku saabsan shaqo-helidda<br>☐ garo fursadaha shaqo oo kala duwan oo ka jira Australia<br>☐ sheeg siyaabaha loo helo shaqada<br>☐ sameey xirfadaha wada-hadalka afka ah ama aan afka ahayn ee wareysiyada | ☐ inaad faahfaahinta shaqsiyadeed ku qorto codsiyada shaqo<br>☐ inaad qorto risumeega iyo warqadda lifaaqa<br>☐ inaad ka baarto fursadaha shaqo-helidda online-ka<br>☐ inaad raadsato aqoonsiga shahaadooyinka dibadeed |

## Lacagta

| Miyaad: | Adigu ma: | Miyaad samayn kartaa waxyaalahan: |
|---|---|---|
| ☐ fahan in bangiga intarneedka inuu yahay qaabka bangiga Australia ee guudAustralian banking practice<br>☐ ogsoonow qarashyada nolosha oo sarreeya halkan Australia<br>☐ fahan kaalinta kareedhitka ku leeyahay bulshada Australia miyaadse aqoonsan tahay khataraha waaweyn oo ku jira qaadashada deynta<br>☐ fahan lacag-bixinnada Centrelink iyo intay qadar le'egyihiin<br>☐ fahan haya'daha iyo xirfadaha bangi ee Australia | ☐ garo lacagta Australia mase fahamsan tahay qiimaheeda marka la barbardhigo lacagahooda hadda jira<br>☐ garo fursadaha lagu yareeyo qarashyada guriga<br>☐ adeegso kartaa kalmadaha ku saabsan lacagta iyo bangiga | ☐ inaad adeegsato tas-hiilaadka ATM iyo EFTPOS si aad ugala soo baxdo lacagta aadna u samayso gadashada<br>☐ inaad samaysato miisaaniyadda guriga oo asaasiga ah |

## Socdaalka

| Miyaad: | Adigu ma: | Miyaad samayn kartaa waxyaalahan: |
|---|---|---|
| ☐ fahan in u safrida Australia ay aad u dheer tahay, aadna sii mari karto meelo transid ah<br>☐ fahan waxyaalaha tas-hiilaadka ah iyo adeegyada lagugu siin doono diyaaradda dhexdeeda<br>☐ fahanin lagugula kulmi doono madaarka markaad imaanayso Australia<br>☐ fahan waxyaalaha aad u qaadan karto/kuwaa aadan u qaadan karin Australia | ☐ garo macluumaadka muhiimka u ah dokumantiyada safarka<br>☐ sheeg faahfaahinta ku saabsan macluumaadka duulimaadkaaga<br>☐ sheeg hab-raacyada ka-bixidda madaarka oo ay ka midka yihiin baarista, ammaanka, iyo socdaalka<br>☐ sheeg kartaa hab-raacyada imaanshaha madaarka oo ay ka midka yihiin socdaalka, karantiilka iyo qaadashada baaggaga | ☐ inaad soo buuxiso kaarka musaafirka imaanaya Australia<br>☐ inaad xirato boorsada taas oo ku habboon shuruucda madaarka/diyaaradaha iyo kastamada iyo karantiilka Australia |

Qoraal dheeraad ah

**Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan la xiriir AUSCO@dss.gov.au**

*Qaybta dib loo eegay (April 2018)*